

Qorshaha Hawada ee Xiligga Qaboobaha (winter) ee 2017-18

Amniga iyo fayada ardaydeena iyo shaqaaleheena ayaa inoo leh ahmiyadda ugu saraysa sidoo kalena go'aanka xiritaanka dugsiya ma ahan arin fudud.

Inta uusan go'aansanin xiritaana iskuulka hawada qaboobaha(winterka) oo aad u xun awgeed, Hoggaamiyaha Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul Joe Gothard wuxuu kala tashadaa khubaro kala duwan oo ku sugan gudaha iyo dibada degmada. Waxaa naga go'an inaan had iyo jeer ogaysiino qoysaska, shaqaalaha iyo bulshada xiritaanka iskuullada ee ka dhasha hawada oo xumaato.

Fadlan ogow in aan si joogta ah u la socono saadaasha hawada ee ay samayso [National Weather Service](#) si aan u gaarno go'aanka ugu haboon ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska. Sidoo kale, in dib loo dhigo waqtiyada bilowga fasaladda ayaan u suurta galaynin Dugsiyada Dadwaynaha ee Saint Paul sababo saadka la xiriiri awgeed.

MAALIN QABOOW (COLD DAY)	MAALIN BARAF LEH (SNOW DAY)
<p>Xiritaanka uu sababo heer-kulka ama dabeyl dhaxan leh</p> <ul style="list-style-type: none"> Iskuulka waa la xirayaa/joojinayaa haddii ay sadaasha hawada ee 6 a.m. ee subaxa xiga sheegayso: <u>Dabayl leh dhaxan</u> ka hosaysa -35 degree Fahrenheit <u>Ama</u> Heer-kulka uu ka hooseeyo -25 degree Fahrenheit** Go'aanka xiritaanka iskuulka waxaa la gaarayaa ugu dambayn 6:30 p.m. habeenka ka horeeya xiritaanka. Waxaa qoysaska lagu ogaysiin doona telefoon, fariin ama e-mail si toos ah loogu dirayaa qoysaska, sidoo kale waxaa lagu daabacayaa barta internetka ee spps.org Waxaa wargalin loo dirayaa saxaafada(sida TV-ga, wargaysyada,iyo raadiyoyada.) <p>Waxa la joojinaya/ la baajinayo waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> Fasallada iyo barmaamijyada dhammaan dugsiyada PreK-12 Wax-barashada khaaska ah ee dhallaanka Extended day for learning (EDL) Field trips Dugsiyada sare ee fiidkii Fasallada waxbarashada bulshada ee dhalin-yarada Howlaha qoysaska lagaga qayb-galinayo arimaha iskuulada (sida Machadka Parent Academy, Open house iyo shirarka iyo wixii la mid ah) Joojinta ku saabsan ciyaaraha waxaa go'aan looga gaaraa si gaar ah. Jadwadlka isbadellada waxaa lagu daabacaa bogga spps.org/sports Barmaamijka Discovery club wuxuu ka soconayaa meelo kooban. Qoysaska ka diiwaan gashan barmaamijka Discovery Club waxaa lala socodsiiin donaa maclumaadka ku saabsan meelaha furan. Fasallada iyo barmaamijyada dadka waaweyn ee hoos ku xusan waa ay furnaanayaan: <ul style="list-style-type: none"> Wax-barashada bulshada Xarunta Hubbs Wax-barashada qoysaska ee Early Childhood. Haddii ururro iskuulka ka baxsan (sida YMCA, Girl Scouts, tutoring) ay oggololaansho hasyaan in ay dhismaha iskuulka ku qabsadaan shirar ama howlo. 	<p>Xiritaanka/joojinta uu sababo barafka ama ay khatar tahay in gaadiid lagu wado</p> <ul style="list-style-type: none"> Iskuulka waa la joojinayaa haddii baraf xoog leh yimaado oo uu sababo xaalad halis keenta oo aan saamaxaynin in basasku ku socdaalaan waddooyinka ama barafku uu kaxanibo in shaqaaluhu ay si nabdoon ku yimaadaan shaqada. Go'aanka xiritaanka waxaan la gaarayaa ugu dambayn 5 a.m. subaxa fasalada la joojinayo Waxaa ogaysiis telefoon, fariin ama e-mail si toos ah loogu dirayaa qoysaska, sidoo kale waxaa lagu daabacayaa barta internetka ee spps.org Waxaa wargalin loo dirayaa saxaafada(sida TV-ga, wargaysyada,iyo raadiowga.) <p>Waxa la joojinayo/ xiritaanka iskuulku uu saamaynayo waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> Fasallada iyo barmaamijyada dhamaan dugsiyada PreK-12 Wax-barashada khaaska ah ee dhallaanka (Early Childhood Special Education) Extended day for learning (EDL) Field trips Dhacdooyinka muhimka ah/Events Dugsiyada sare ee fiidkii Goobaha waxbarasho ee aagga Waxbarashada qoysaska ee dhallaanka Howlaha qoysaska loogaga qayb-galinayo arimaha iskuulada (sida Machadka Parent Academy, Open house iyo shirarka iyo wixii la mid ah) Ciyaaraha ama isboortiga in la joojinayo iyo in kale waxaa go'aan looga gaaraa si gaar ah. Jadwadlka isbadellada arintaas ku saabsan waxaa lagu daabacaa bogga spps.org/sports Barmaamijka Discovery Club waa la xirayaa. Fasallada iyo barmaamijyada dadka waaweyn waa la joojinayaa, oo ay ka mid yihiin goobta Hubbs iyo East side Hub@Harding. Haddii ay ururro iskuulka ka baxsan (sida YMCA, Girl Scouts, tutoring) oggololaasho u hasyaan in ay dhismaha iskuulka ku qabsadaan shirar ama howlo kale waa la baajinayaa howlahaas malintaas. Ka la xiriir qabanqaabiyaha haddii aad su'aal qabto.



Qorshaha Hawada ee Xiligga Qaboobaha (winter) ee 2017-18

SAME DAY WEATHER CANCELLATIONS

Joojinta shaqada after-school sababo la xiriira hawada oo la filayo in ay sii xumaato maalin iskuulku uu furan yahay oo ay xiisaduhu u baxayaan si caadi ah.

- Go'aanka xiritaanka/joojinta iskuulka, haddii ay hawadu xumaato maalinta gudaheeda, waxaa la gaarayaa ugu dambayn 10 a.m. aroornimo.
- Iskuulladii xilliga caadiga ah la fasaxi jiray 2.p.m. waxaa la sii dayn doonaa 1:30 p.m. Arrintan ayaa u sahlaya gaadiidka basasku inay ku geeyaan guryaha ardayda xilligii saxda ahaa. Dhammaan iskuullada kale waxaa la fasaxi doonaa xilligoodii caadiga ahaa.

Waxyaabaha xiritaankani uu saamaynayo waxaa ka mid ah:

- Barmaamijka After-schoolka iyo howlaha extra-curricular ah
- Barmaamijka Pre-K ee galabtii
- Fasalada ka horeeya Kindergerteen ee PreK hadii ay galabtii yihiin.
- Waxbarashada dhallaanka ee khaaska ah (Early Childhood Special Education)
- Extended Day for Learning (EDL)
- Flipside
- Field trips
- Dhacadooyinka iskuulka (events)
- Dugsiga Sare ee Fiidkii
- Goobaha waxbarasho ee Area Learning Centers
- Tacliinta bulshada ee dhalin yarada iyo dadka waaweyn (oo ay ka mid tahay Hubbs Center and East Side Hub@Harding.)
- Howlaha qoysaska loogaga qayb-galinayo arimaha iskuulada sida (machadka waalidiinta, Open house, shirarka iyo wixii la mid ah)
- **Ciyaaraha ama spoortiga in la joojinayo iyo in kale** waxaa go'aan looga gaaraa si gaar ah. Jadwadlka isbadellada arintaas ku saabsan waxaa lagu daabacaa bogga spps.org/sports
- **Barmaamijka Discovery Club xiritaanka ma saamaynayo** oo wuu kafuranyahay goob walbo ilaa ardayda oo idil ay galbadaan.